

Marka ay haystaan caymis, waxay diyaar u noqan doonaan wax kasta oo sanad dugsiyeedku keeno.

Carruurta leh caymis caafimaad waa kuwo si fiican diyaar ugu ah in ay shaqo wanaagsan qabtaan dugsiiga kalena guulaysta noloshooda. Medicaid iyo CHIP waxay bixiyaan caymis caafimaad oo lacag la'aan ah ama qiimihiisu hooseeyo oo loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada. Carruurta waxay heli karaan baaritaanno joogto ah, tallaalo, booqashada dhakhtarka iyo dhakhtarka ilkaha, daryeelka isbitaalka, adeegyada caafimaadka dhimirka, daawooyinka la isku qoro iyo waxyaalo kale oo dheeraad ah. Diiwaangelintu way furan tahay inta sanadka lagu jiro oo idil. Waxaa laga yaabaa inaad hadda u qalanto, xitaa haddii aad hore u codsatay. Qoysaska ka kooban afar qof oo qaata dakhli dhan illaa \$80,000* ayaa u qalmi kara.

Booqo [InsureKidsNow.gov](https://www.insurekidsnow.gov) ama wac **1-877-543-7669 (KIDS-NOW)** si aad wax dheeraad ah uga ogaatid caymiska caafimaadka ee qoyskaaga.



[InsureKidsNow.gov](https://www.insurekidsnow.gov)

*Heerarka dakhliga soo xarooda wuxuu ku kala duwanyahay gobol ahaan.
Paid for by the U.S. Department of Health and Human Services

CMS Product No. 11668-SOM
May 2024